

FAYRUSTA KORONADU MA U KALA GUDUBTA ARDAYDA JOOGTA ISKUULKA?

Ku socota waalidiinta: Waxa la rabaa inaad macluumaadkan la akhrisato ilmahaaga.

Fayrustu waa abuur aad u yaryar oo la arki karo keliya haddii la isticmaalo qalab weynayso weyn ah oo la dhaho mikoroskoob. Waxannu rabnaa in aannu samayno daraasad ku saabsan fayrustan cusub oo la dhaho fayrusta koroonada ah. Fayrusta koroonadu waxay ku faaftay dunida oo dhan, xataa Noorway. Fayrusta waxa inta badan loo sawiraa qaabkan:



Fayrusyada qaarkood ayaa lagu bukoodaa waxaanay dadka kale u sii gudbaan dad marka uu qufaco, hindhiso qofka qaba ama marka la taabto meel lagu qufacay ama lagu hindhisay. Carruurta qaaday fayrusta waxa ku dhici kara qufac, cunaha oo xanuuna, qandho ama caloosha oo xanuunta, qaarkoodna waxba ma dareemaan. Carruurta intooda badan si dhakhso ah ayey u caafimaadaan

Si looga hortago in arday badan qaadaan fayrusta koroonada, waa in qof kasta gacmaha dhaqo marar badan isla markaana waxa dhici karta in ardayda loo qaybiyo kooxo joogto ah. Waxannu rabnaa in aannu aqoon dheeraad ah u yeelano qaabka fayrusta koroonada isu qaadsiiyaan carruurta iyo dadka waaweyn ee jooga iskuulka.

WAA MAXAYA SABABTA ANIGA LA II WEYDIINAYO INAAN KA QAYBGALO?

Ma rabtaa inaad naga caawiso in aannu ogaano in fayrusta koroonadu ku faafayso iskuulkaaga? Waxa lagu weydiinayaa inaad ka qaybgasho waayo fayrusta koroonada ayaa laga helay adiga ama qof aada iskuulkaaga. Qaar badan oo ka mid ah ardayda kale ayaa iyana la weydiinayaa inay ka qaybgalaan. Dhakhtar jooga degmada aad ku nooshahay ayaa na soo ogeysiiyey in qof iskuulka kula dhigta uu ku dhacay cudurka Karoona.

MAXAAN SAMAYNAYAA HADDII AAN KA QAYBGALO?

Haddii aad ka qaybgasho, waxannu kaa codsan doonnaa inaad candhuuf ku tufto tuubo gaar ah. Waxannu rabnaa laba tijaabo oo candhuuf ah oo lagaa qaaday labo maalmo oo kala duwan. Dadka waaweyn ee jooga guriga ayaa loo sheegi doonaa qaabka aad u qadayso tijaabada si ay kuu caawiyaan. Tijaabada waxaad ku qaadaysaa guriga, mana laha wax xanuun ah. Mid ka mid masuuliyiinta darsaadda ayaa tijaabada ka soo dooni doona gurigiina ama meel u dhow iskuulkaaga. Sida kalena waxannu rabnaa in adiga ama waalidkaagu ka jawaabtaan su'aalo aannu samaynay. Su'aaluhu waxay ku yaalaan warqad ama ku jiraan internetka. Waxannu ku weydiin doonnaa inaad bukto iyo inaad tusaale ahaan qufacayso ama qabto qandho.

ANIGA AYAA DOORANAYA INAAN KA QAYBGALO IYO IN KALE

La hadal dadka waaweyn ee jooga guriga. Adiga iyo waalidkaaga ayaa isla go'aamin kara inaad ka qaybgashaan daraasadda iyo in kale. Dhibaato ma leh haddii aanaad rabin inaad ka qaybgasho. Waalidkaaga ayaa Machadka Caafimaadka Dadweynaha u sheegi doonnaa inaad ka qaybgalayso iyo in kale.